



1

Goorme Ayaan dhakhtarkayga kala hadli karaa baaritaanka Lp(a)-ga?


- Taariikh qoys ama shaqsiyeed oo cudurka wadnaha hore u bilowday (taasoo macnaheedu yahay in ragga ay da'doodu ka yar tahay 45 sano dumarkuna ay ka yar tahay 55 sano)
- Taariikh nololeedka qoyska la ogyahay ee Lp(a)-ga sare
- Baadhitaanka cudurka Hypercholesterolemia qoyska ku dhacda (FH)- xaalad la iska dhaxlo oo keenta in jidhku si liidata dib ugu isticmaalo LDL ama kolestaroolka xun, taasoo kordhisa halista cudurrada wadnaha iyo xididdada dhiigga



Sideen ayan baaritaan liigu sameeya?

- Baaritaanka caadiga ah ee kolestaroolka, oo sidoo kale loo yaqaano xuubka dufanka, ma uusan ka mid ahayn Lp(a)-ga.
- Kala hadal dhakhtarkaaga wax ku saabsan ku darista Lp(a)-ga baaritaankaaga xiga ee kolestaroolka.

2



Maxey ka dhigan tahay natiijada?

- Heerarka ka Sarreeya 50 mg/dL (125 nmol/L) waxaa loo tixgeliyaa inuu sareeyo.
- Heerka sare ee Lp(a)-ga wuxuu kordhiyaa khatarta wadna xanuunka, istarooma, cudurka halbowlaha wadnaha (PAD), iyo xanuunka xididdada wadnaha.
- Lp(a)-ga waa arrin halis u ah hiddesideyaasha cudurada wadnaha. Haddii xubin ka mid ah qoyskaagu uu leeyahay Lp(a)-ga oo sareeysa, waxaa muhiim ah in la baaro oo lagu dhiirrigeliyo xubnaha kale ee qoyska, sida waaliidiinta, walaalaha, iyo carruurta, inay sidaas oo kale sameeyaan. Weydii dhakhtarkaaga wax ku saabsan fursadaha baaritaanka hiddo-sidaha sida [baaritaanka taxanaha](#).

3

4

Sideen hoos ugu dhigi karaa Lp(a)-gayga?

- Inkastoo isbedelka hab nololeedku ma yareyn karo heerarka Lp(a)-ga, waxa muhiim ah in hoos u dhigto halista guud ee wadna xanuunka adigoo:



cunaya cunto caafimaad leh



in aad ahaato mid jir dhaan u firfircoon



ilaalinaya miisaanka jidhka si caafimaadka leh



joojinaya isticmaalka tubaakada



Xaddididaya isticmaalka khamriga



helaya hurdo kugu filan

Caadooyinkaas waxaa sii dheer **qaadashada daawooyinka sida lagu qoray** waxay sidoo kale kaa caawin kartaa yareynta khatarta dhiig karka, kolestaroolka sare, cayilka iyo sonkorowga.

*Daawayn cusub oo lagu yareeyo heerarka Lp(a)-ga ayaa la soo saaray. Kala hadal dhakhtarkaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Kala hadal dhakhtarkaaga Lp(a)-ga iyo sida loo dhimo halista wadno qabadka iyo istaroom dhici kara mustaqbalka.

Wax badan ka baro bogga heart.org/lpa

5

Caymiskeyga caafimaad miyuu daboolayaa baaritaanka Lp(a)-ga?

- Caymiska caafimaadka inta badan wuxuu daboolayaa baaritaanka Lp(a)-ga, laakiin haddii aadan hubin, la xiriir caymiskaaga adigoo isticmaalaya kadhka CPT 83695 si aad u hubiso caymiska. Haddii aan la daboolin, dhakhtarkaagu wuxuu kaa caawin karaa inuu kuu helo xulashooyin qiimo jaban.